

ARIN

Canada waxay weli tahay waddanka keliya ee G8 ah oon lahayn tab qorshe qaraneed lagu yareeyo faqriga, iyada oo xaqiiqo ahaan ay 4.8 milyan oo reer Canada ihi ay haatan ku nool yihiin xaalad faqri.

XAALAD

Canada waa waddanka 15 aad ee dunida ugu taajirsan marka laga eego xagga dakhliga qof ahaaneed ee GDP, hadana 1 ayaa 7 dii qof reer Canada ahba aan awoodin inuu daboolo baahidiisa asalka ahe naf la tacaalid. La'aanta shaqo laga helo dakhli baahi dabooli kara awgeed, ayaa 4.8 milyan oo reer Canada ihi aysan heli karayn guryeyn, caafimaad, xanaano caruur, iyo cunto nafaqo leh toona.

Faqrigu waa ka weyn yahay helitaanka dakhli kaafiya; waa guud ahaanba wax kasta oo ka hortaagan qof inuu dhab ahaan uga qayb galo bulshada reer Canada. Shakhsiyaadka ku nool faqriga waxaa soo wajiha inay degaan meelo ka hooseeya deegaanada caadiga ah, gaajo, nafaqo yaraan, cudurro iyo jirrooyin la daaweyn kari lahaa, xasilooni la'aan shaqo, walbahaar sii kordha iyo ka xayirnaan dhexgal bulsho, dareen isku filnaansho la'aan, fursadaha horumar iyo wax barasho oo soo yaraada, takoorid, iyo xumaa ku dhejin (Sharaf Kulli ah: Qorshe Qaran oo lagaga Hortagayo Faqriga Canada).

Canada waxay sii nqoonaysaa meel aan la goyn karayn in lagu sii noolaado. Khidmada mushaar ahaan ee ugu yar inuu qofka caadiga ihi ka qaato daafaha Canada waxay dheer tahay hal shilin (penny) oo keliya khidmadii caadiga ahayde ugu yarayd ee 1975 kii lagu simay sicir bararka, iyada ay xaqiiqo ahaan jirto in guryeynta deegaanka, cuntada, gaadiidka, xanaanada caruur iyo qiimaha caafimaadku ay aad lama huraan ahaan sare ugu kaceen.

Qiimaha faqrigu aad buu uga fogyahay qiimaha dhimistiisa. Iyada oo loo eegayo warbixin uu qoray Golaha Qaranka ee Ladnaantu, faqrigu waxa uu canshuur bixiyeyaasha ugu kacaa in ka badan \$24 bilyan sanad walba. Isku darka qiimaha guri la'aantana waxaa lagu qiyaasay ilaa \$7.05 bilyan sanad walba. Saas ooy tahay, keliya kala bar oo bar qiimahaas ayaa loo qoondeeyey in Canada looga yareeyo guri la'aanta sanad walba. Raacsiis ahaan, maalgelin dhan \$1 ayaa caruurta ay da'dodou ka yar tahay 6 jir loogu kaydiyaa \$9 si ay u isticmaalaan mustaqbalkooda. Dhamaan Wilaayadaha iyo deegaannada Canada, marka laga reebo British Columbia, waxay qabatimeen ama ay hadda bilaabaya tabo ay ku yaraynayaan faqriga. Mid ka mid ah furayaasha tabahaasi waa baahida weyn ee loo qabo inay dawladda federaalku wacad ku gasho inay yaraynayso faqriga. Inta badan shaqada ay wilaayadaha iyo deegaanadu ku ballan qaadeen si ay u yareeyaan faqriga waxay u baahan tahay taageero is dabo jog ah ooy kala wada shaqeyaan dawladda federalka ah.

Waxaan u baahannahay tabo faqri yarayn oo heer qaran ah, kuwaas oo si dhab ah u abbaaraya sababaha gunta u ah faqriga, laguna qaado tabo iyo jidad la sii cabbirtay. Tabahaani waxay lahaanayaan hadafyo laga gun gaari karo oo diiradda saaraya baahiyada iyo ka qayb galka kuwa uu faqrigu waxyeelleeyey. Mas'uuliyad, isla xisaabtan iyo tusmooyin horukac la taabto ayaa ka dhigi doona Tabaha Fari Yarayn ee heer Qaran kuwo wax ku ool ah.

SU'AALO

1. Dadaal intee la eg ayuu ka geysanayaa xisbigaagu u ololaynta ka Yaraynta Faqriga heer Qaran ee Canada?
2. Xisbigaagu ma taageeraa Yaraynta Faqriga heer Qaran in lagala shaqeeyo wilaayadaha, deegaanada iyo xaafadaha si Canada looga yareeyo faqriga?

ILO:

Faah faahin dheeri ah iyo warqado siyaado ah ee taxanahaan: <http://spno.ca/canada-votes-2015>

Translated by: African Canadian Social Development Council (ACSDC)

